

# Wargeyska Mountain View

## Diseembar 16, 2015

**Jimco, Diseembar 18.....Bandhigga Musiikada Fasaxa Waalidiinta, 8:30 a.m.**  
**Isniin, Diseembar 21-Janaayo 3.....Ma Jiro Dugsi, Nasashada Qaboobaha**  
**Isniin, Janaayo 4.....Resumeeyada Dugsiga**  
**Qamiis, Janaayo 7.....Guddiga Bulshada Dudgisga**  
**Talaado, Janaayo 12.....Shirka Waalidiinta iyo Agaasimeyaasha**

### **Fariinta Agaasimaha**

Si xoojinta imaashada dugsiga loo fulliyo si wanaagsan, la-talliyaha dugsigena, Miss Cassie, waxay abuurtay boorarka wararka si loola socdo maalmaha ay fasalada u suurtoogashay in dhamaan ardayda ku yimadaan waqtiga loo qabtay. Marka stikarada lagu meeleebo boorka, fasalada waxay shaqeysan karaan munaasabadaha farxadda sida nasashada dheeraadka ah. Waxaan iskudaynaa wax kasta aan ku fakarno si aan uga hortagno baahida loo qabo in si wanaagsan loo horumariyo imaashada ardaydena. Dugsigena wuxuu weli dhib ku qabaa soo daahidda. Jimcahaan la soo dhaafay, in ka badan 11% ardaydena ayaa soo daahday. Tani waxay carqaladeyn ku taahay fasalka, ardayda soo daahdo waxay lumiyaan waqtiga waxbarashada. Fadlan ku dadaal dhamaan inta aad kari kartid si aad caruurtaada ugu kaalmeysid in ay yimadaan dugsiga 7:55, taasoo ah marka gambaleelka kowaad dhaco. Waad ku mahadsan tahay kaalmadaada.

### **Waalidiinta iyo Agaasimeyaasha**

Agaasimeyaasha waxay rabaan in ay kula kulmaan, kula qeybsadaan waxa ku cusub Mountain View, iyo in ay ka jawaabaan su'aalaha laga yaaho in aad qabtid. Wada hadalkena xiga ee loo qabto Waalidiinta iyo Agaasimeyaasha waxaa lagu qaban doonaa Xarunta Waxbarashada Bulshada (Community Learning Center), maaalinta Talaadada, Janaayo 12, marka ay tahay 8:15 a.m. Waxaan rajeyneynaa in aan halkaas kugu aragno.

### **Bandhigga Muusikada Waalidiinta**

Bishii Diseembar 18, dhamaan waalidiinta iyo xubnaha qoyska waxaa lagu casumay in ay arkaan caruurtooda oo ku hawlan heesaha muusikada, taasoo nagu kaalmeeyso xuska xilliga fasaxa. Dhamaan heerarka darajooyinka waxay soo mari doonaan hortaada si ay kuugu heesaan adiga! Bandhigga wuxuu bilaaban doonaa 8:30, sidaas darteed fadlan fadhiista kuraasta qolka bandhigga ka hor inta aan la gaarin waqtigaas.

### **America First Credit Union Waxay Bixisaa Deeq Gacan Furan**

Dugsiga Hoose Mountain View wuxuu rabaa in uu u mahad celiyo America First Credit Union sida gacanta furan ay deeqda \$2,000.00 u siiyeen Mu'asasada Caruurta 100%. Waa la dalbay deeqdaan, waxaana heshay Mrs. Kathy Gilmour, macalinka Extended Learning Program (Barnaamijka Waxbarashada Fidsan), iyo ardaydooda. Maaliyaddaan waxaa la siin doonaa farsamada fasalka Extended Learning Program.